



GUDDIGA FARSAMADDA DIB-U-HESHIISIINTA EE KONFUR GALBEED

Taariikh: 04/02/2023

WAR-MURTIYEEDKA SHIRKA DIB-U-HESHIISIINTA SIYAASADEED IYO KAN BULSHEED EE KONFUR GALBEED SOOMAALIYA.

BAYDHABO– Shirka wada-tashiga dib-u-heshiisiinta siyaasadeed iyo kan bulsheed ee dowlad goboledka Koonfur Galbeed Soomaaliya oo uu ku baaqey Gudoomiyaha Golaha Shacabka BFS **M.ne. Sheekh Adan Maxamed Nuur Madoobe** taariikhdu marka ahayd 19kii bisha November 2022, si lamid sidaas oo kale uu soo dhaweyeen Madaxweynaha DKGS 20 November 2022 iyo siyaasiyiinta ku midoobey dalladaha kala ah; Midowga Musharixiinta, Madasha samata bixinta iyo Golaha Badbaadada KGS.

Ka dib, Guddomiyaha Golaha Shacabka BFS ayaa soo Magacaabay isaga oo la tashaday Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya Dr. Xasan Sheekh Maxamuud, guddi farsamo oo ka kooban toddobo (7) xubnood oo ah guddiga farsamada ee arrimaha dib-u-heshiisiinta Koonfur Galbeed Soomaaliya.

Madaxweynaha JFS **Dr. Xasan Sheekh Maxamuud** ayaa si rasmi ah u furay shirka Dib-u-heshiisiinta Koonfur Galbeed Soomaaliya taariikhda marka ahayd 17 Janaayo 2023, shirkaas oo ay ka soo qeyb galeen Gudoomiyaha Golaha Shacabka **M.ne. Sheekh Adan Maxamed Nuur Madoobe**, Madaxweynaha DKGS **M.ne Cabdicasiis Xasan Maxamed (laftagreen)**, iyo siyaasiyiinta ku midoobey dalladaha; Midowga Musharixiinta, Madasha Samata-bixinta KGS iyo mas'uuliyiin kala duwan ee labada heer ee Federaalka, Odoyaasha dhaqanka iyo Bulshada Rayidka ah.

GUDDOMIYAHA GUDDIGA DIBU-HESHIISIINTA

Markuu Arkay: Qodobka 61aad Farqadda 2aad Dastuurka KMG ah ee JFS iyo Qoboka 142 aad Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG;

Markuu Arkay: Qodobka 4aad ee War-murtiyeedka shirka dib-u-heshiisiinta oo ka qabsoomay magaaladda Baydhabo 17, Diseember 2022 oo tilmaamayo in Guddoomiyaha Golaha Shacabka uu soo magacaabo Guddiga Farsamadda;

Markuu Arkay: Qodobka 3aad farqadda 5aad ee Dastuurka DKGS;

Markuu Arkay: Qodobka 37aad farqadda 1aad Go'aanka Golaha Wakiiladda Koonfur Galbeed Soomaaliya in ay tahay hay'ada ugu sarreysa ee sharci dajinta Dowladda Koonfur Galbeed;

Markuu Dhageystay: Talo soo jeedinta odoyaasha dhaqanka KGS oo ah marjica marka ay la soo gudboonaato xaalad Goloyaashada Dowladda si waafaqsan Qodobka 60aad Xarafka (C) ee Dastuurka KGS, xukuumada Koonfur Galbeed Soomaaliya, iyo siyaasiyiinta ku middobey dalladaha; Midowga Musharixiinta, Madasha Samata-bixinta Koonfur Galbeed Soomaaliya iyo Bulshada Rayidka.

Markuu Arkay: Dhamaan Nuquladda ay soo wada Gudbiyeen Golaha Wakiiladda nuqulka 1aad ee soo baxay **18ka Abriil 2020** iyo Nuqulka **2aad Tix: GW-DGKGS/XG-09/2020** kuna taariikhsan **20ka Abriil 2020** oo labaduba ku saabsan: wax kabadalka Dastuurka Koonfur Galbeed Soomaaliya Qodobka 50aad kaas oo lagu daray Farqro 3aad;

Marka uu Tixgaliyey Nuqulka go'aan ay soo gudbiyeen oo ay xukumadda DKGS Shirka Dib-u-heshiisinta, kuna taariikhsan 01st Febraayo 2023, iyo kan dalladaha ku midoobey; Midowga Musharixiinta iyo Madasha samata bixinta Koonfur Galbeed Soomaaliya oo isna ku taariikhsan 2 Febraayo 2023;

Markuu Arkay: Ismaandhaafka Siyaasaddeed ee ka jiro KGS uu caqabad ku yahay dhamaan horumarada laga sameyn lahaa la dagaalanka kooxda khawaarijta al-Shabaab iyo Horumarinta Koonfur Galbeed Soomaaliya;

Waxaa uu gudoomay guddoomiyaha guddiga dibu-heshiisinta ahna Gudoomiyaha Golaha Shacabka si waafaqsan Qodobka 61aad Farqadda 2aad Dastuurka KMG ah ee JFS iyo Qodobka 142 aad Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG, sidoo kalena isaga oo tixgalinaya Qodobka 37aad Farqadda 1aad ee Dastuurka KG.

Qobkobka 1aad

Gudoomiyaha Golaha Shacabka marka uu xaqiijiyey arrimaha siyaasadeed iyo mida bulsheed ee dooda ka taagneyd, wadatashi dheer kadib waxaa la go'aamiyey:

- A) In ay odoyaasha dhaqanka beelaha dowlad goboleedka Koonfur Galbeed ay soo xulaan mudada u dhaxeysa bisha Novembar 2023-ka ilaa bisha Decembar 2023 xubnaha Golaha Wakiiladda ee Baarlamaanka KGS iyaga oo la tashanaya beelahooda si waaqsan **Qodobka 37aad farqadda 3aad** Dastuurka KG.

B) In doorashada guddoonka golaha wakiilada Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed Soomaaliya iyo doorashada madaxweynaha Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed Soomaaliya la qabto inta lagu guda jiro bisha Janaayo 2024.

Qobkobka 2aad

Dhammaan guddoomiyaha guddiga dibu-heshiisiinta, Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed, siyaasiyiinta ku midoobey dalladaha; Midowga Musharixiinta iyo Madasha Samata-bixinta Koonfur Galbeed Soomaaliya waxa ay isku raaceen in Wasaarada Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dibu-heshiisiinta ay dhaqan galineyso Heshiiska qodobada kor ku xusan.

Wabilaahi Towfiiq.

